


## Bacda shaybaar iska qaadista waxaa ku jira:

- A Tuubada shaybaarka oo ku dhegsan koodka xariiqsan Aad u hubso in tobbanka lambar aqoonsiga ku qoran koodka xariiqsan ay sax yihiin.
- B Baakada ku jirta milka/qaska cusbada.
- C Hal cuf/guf/dhangedda shaybaarka oo in shaybaar iska qaadista awgood la isticmaalo.
- D Koobka candhuufta.
- E Qoyaan-dhuuqe (lama isticmaalo xilliga shaybaar iska qaadista, waa in shaybaar iska qaadista kaddib lagu meeleyaa bacda yar (G)).
- F Tilmaan-bixin ku saabsan shaybaar iska qaadista (qoraalkaan).
- G Bac yar. Waxaa ku dhexjira hal qoyaan-dhuuqe oo aan la isticmaalin xilliga shaybaar iska qaadista, waxaa shaybaar iska qaadista kaddib lagu meeleyaa oo keliya bac yar (G)
- H Bac wayn (oo lagu tuuro cufka/gufka iwm)



## Tilmaan-bixin ku saabsan shaybaar iska qaadista sanku, dhuunta iyo candhuufta

Tilmaan-bixinta waxay ku saabsan tahay in qofku u laf ahaantiisa shaybaarka iska qaado, laakin haddii loo baahdo xitaa adigaaga waalidka ah ayaa ubadkaga ka caawin kara shaybaar iska qaadista.



Bogga ku xiga aqriso jadwalka tasmada ee walxaha shaybaar iska qaadista iyo ku calaamadaysan xarfaha. Kahor inta aad shaybaar iska qaadista bilaabin, hab taxadarsan u aqriso jadwalka tasmada kaddib tilmaan-bixin ku saabsan shaybaar iska qaadista.


1

## Isku-diyaarinta shaybaar iska qaadista

*Haddii qof cunug ah shaybaar laga qaadi doono, waxaa talo ahaan la soo jeedinayaa in adiga oo qof waalid ah in wadajir ubadkaaga aad aqrisataan tilmaan-bixin.*

*Haddii loo baahdo waxaad waalid ahaan shaybaar ka qaadi kartaa ubadkaaga.*

1. Bacda yar dibadda u soo saar (G) kaddib agtaada dhigo. Waxyaalaha kale ee bacda wayn ku jiraan (H) dhexgeli bacda yar (G). Fur baakada cufka/gufka (C).
2. Soo saar baakada milka/qaska cusbada ku jirta (B) kaddib daboolka ka fur adigoo madaxa ka maroojiya.
3. Tuubada shaybaarka ka saar daboolka (A) kaddib daboolka meel dhig iyadoo girgiryada/filotuurada kor u si jeedaan.
4. Milka/qaska cusbada (B) tuubada shaybaarka ku shub (A). Si wad sii-haynta tuubada shaybaarka (A). Baakada cusbada ee maran ku tuur bacda weyn (H).
5. Imminka waa inaad fulisaa iska qaadis saddex shaybaar hab waafaqsan tilmaan-bixin hoos ku qoran.



2

## Dhuunta - shaybaar iska qaadista 1

1. Qabso cufka/gufka (C) kaddib geli gudaha daanka/dhabanka kaddib ku sii riix dhuunta inta aad kari karto.
2. Kaddib ku xoq cufka/gufka suufka qiyaastii 20 ilbiriqsiyo dhinaca kasta oo aad u hooseeya dhuunta.
3. Cufka/gufka ka soo (C) saar dhuunta.




20 ilbiriqsi

3

## Sanka - shaybaar iska qaadista 2

4. Imminka cufka/gufka suufka dhexgeli gidaarka sanka 2–3 sm. Ku xoq qiyaastii 20 ilbiriqsi. Adigoo isticmaalayo isla cufka/gufka isla sidaas ku samee labada dalool ee sanka.
5. Cufka/gufka (C) ka soo saar sanka kaddib hay cufka/gufka (C) isla gacanta aad ku hayso tuubada shaybaarka (A).




20 ilbiriqsi

4

## Candhuufta - shaybaar iska qaadista 3

1. Soo saar koobka candhuufta (D) kaddib dhawr jeer candhuuf ku tuf si sagxadda hoose si ay wanaagsan u wada gaarto.
2. Soo qabso cufka/gufka (C) kaddib ku walaaq candhuufta 20 ilbiriqsi.
3. Cufka/gufka cufka/gufka suufka (C) dhexgeli tuubada shaybaarka (A) Kaddib ku walaaq qaddar qiyaastii 20 ilbiriqsiyo. Cufka/gufka ka soo saar tuubada shaybaarka.
4. Cufka/gufka (C) iyo koobka candhuufta (D) ku tuur bacda wayn (H).
5. Daboolka tuubada shaybaarka hab aad u taxadarsan ugu xir (A). Mar labaad hubso in dareeraha u weli ku jiro tuubada shaybaarka kaddib aad daboolka ugu xirtay. Tuubada shaybaarka dhexgeli (A) bacda yar (G). Bacda waxaa ku dhexjira qoyaan-dhuuqe kaasoo ah in aan la taaban.



20 ilbiriqsi

---

## Shaybaar iska qaadista kaddib

*Bacda yar sidaas ku dhaaf (G) kaddib waxaad geysa goobta lagugu geey markii ballanka lagu qabtay.*

*Bacda wayn (H) ku jira cufka/gufka, koobka candhuufta tuur kaddib qashinka haray ku tuur halka qashinka guryaha lagu tuuro.*

